

## Bayaano ka socda Oregon OSHA iyo OHA oo kusaabsan afaabyada N95, KN95, iyo P100

Dadka ay khasab ku tahay inay dibadda aadaan way isku dayi karaan isticmaalka afaabyada si ay uga caawiyaan inay sambabadooda ka ilaaliyaan qiica dabka duurka. Afaabyadu waxay abuuri karaan dareen ammaan darro oo been ah haddii aan si sax ah loo dooran, loo xiran oo loo isticmaalin. Waxa dhawr shay oo ay tahay inaad ogaato haddii aad isku dayeyso inaad isticmaasho afaab:

- Iska ilaali isticmaalka afaabyada qalliinka, masarrada iyo afaabyada kale ee caamka. Kuwan waxa la muujiyey inayna qiica difaacin.
- Waxa jira afaabyo khaas ah oo laga yaabo inay difaacaan xoogaa qiic ah. Waxay leeyihiin iin ay tahay in la tixgeliyo marka aad dooranayso inaad isticmaasho iyo in kale.
  - Isticmaalayaashu waxay u baahan yihiin inay doortaan afaab si wacan u leeg oo difaac adag u noqonaya wejiga oo dhan. Barnaamijyada Caafimaadka Shaqeed iyo Badbaadadu waxay bixiyaan waxbarasho iyo kaalmo si ay u taageeraan [isticmaalka saxda ah ee neefsahlaha](#).
  - Leekaanshaha neefsahlaha waa khasab in la tijaabiyo si loo hubiyo inayna hawadu ka dusayn dhinacyada. Dusidda hawadu waxay ka dhigan tahay in wali qofku qiic neefsan karo.
  - Timaha wejiga ayaa keeni kara inaanu afaabku si sax ah u xirmin.
  - Waxa khasab ah in dadaal badan loo galo xulashada “neefsahle gaar ah” oo ay ku qoran tahay erayga “NIOSH” oo “N95” ama “P100” mid ahaan ku dul qoran tahay.
  - Neefsahlayaasha N95 waxay kahortagaan qurubyada yaryar ee kujira qiica, kama ilaaliyaan qofka xiran naqasyada waxyeelada leh ee kujira qiica dabka duurka.
  - Haddii KN95s ay ku jiraan [liiska FDA ansixisay](#) - oo si sax ahna loo xirto - markaa Oregon OSHA waxay rumaysan tahay, xaaladda taagan, in si habboon loogu isticmaali karto shaqada dibadda loogu baxayo marka

Tusmada Tayada Hawadu uu caafimaadka khatar ku yahay ama sii xumaanayo.

- » Isticmaalka neefsahlayaasha NIOSH ayna ansixin waxay keeni karaan walaac kusaabsan ku xadgudub farsamo oo xeerarka ah. Oregon OSHA ma wadaagto walaacan, iyadoo ay jirto xaaladda gurmadka ee qiica dabka duurka ee jira wakhtigan. Oo N95s wali tiradoodu way yar tahay, in kastoo gobolku uu hayo KN95s loogu talagalay xaaladaha dhakhsaha in la siiyo shaqaalaha nugul ee weli la filayo inay shaqeeyaan.
- » Dadka qaba su'aalo kusaabsan isticmaalka afsaabyada ee goobta shaqada waa inay la xiriiraan loo-shaqeeyayaashooda, ama Oregon OSHA <http://osha.oregon.gov/>.
- Dadka qaba xaalado caafimaad oo hore u jiray waa inay kala hadlaan bixiyaha daryeelkooda caafimaadka, kahor isticmaalka neefsahlaha N95 ama P100. Xirtuhu waxa dhici karta inuu neefsigu ku adkaado inta uu xiran yahay afsaabka. Neefsigu waliba wuxuu ku sii adkaan karaa dadka qaba xaaladaha xanuunada wadnaha iyo sambabka.
- Nooca neefsahlaha ee celiya qurubyada qiica ee waxyeelada badan lama heli karo isagoo carruurta leeg.

**Helitaanka dukumiintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku siin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us).